



Ohio Statewide

Family Engagement Center

at The Ohio State University

Dhiirigelinta Dabeecadda Wanaagsan marka Guriga la Jooga.

Hadaan nahay dugsiya, waxaan leenahay fikrado dhawr ah oo fudud oon u adeegsano jihaynta sida aan dhamaanteen u wada shaqaynayno, labadaba carruurta iyo dadka waawayn ba. Waxaan kuwaan ugu yeernaa himilooyinkeena. Himilooyinka ayaa haga qaabka aan talaabo u qaadayno aana iskula hadlayno qayb kasta oo kamid ah dhismaha dugsiyeena iyo maalinteena dugsiya. Isla himilooyinka ayaa ku caawin kara markaad guriga joogto. Waxaa ku caawin kara shaxda noocaan ah oo kaa caawinaya jihaynta dabeecadda wanaagsan ee cunugaaga markuu guriga joogo. Adoo adeegsanaaya shaxda hoose, adiga iyo cunugaaga ayaa abuurin kara shax idiin gaar ah, shax shaqsi ah oo ay ku qoran yihiin himilooyinka ku aaddan sida qoyskaagu ay isku daryeelayaan markaad guriga joogtaan. Inkastoo shaxdaan loo adeegsan karo carruurta da' kasta ooy jiraan ba, tusaalaha shaxda waxaa loo qoray ardayda dugsiya hoose iyo dhexe.

Tilmaamaha: Ku dar himilooyinka dabeecadda ee dugsiyaaga, iyo/ama himilooyinka u dagsan qoyskaaga, joog-taxa koobaad. Go'aanso meelaha ama waqtiyada maalinta ee aad doonayso inaad wax diiradda saarto. Waa fikir fiican inaad ku bilowdo xili maalinta kamid ah oo cunugaagu uu si fiican u dhaqmaayo. Tusaale ahaan, haddii cunugaagu aad ugu fiican yahay raacista himilooyinkaaga subixii, waqtigaas diiradda saar marka hore. Kala hadal cunugaaga siday tahay in la raaco himilooyinka loo dajiyay intuu guriga joogo. Himilooyinka qoys kasta ayaa xoogaa ka duwan tan kuwa kale, waana caadi arintaasi! Cunugaaga sii tusaalayaal si uu u bilaabo raacista tilmaamaha oo la wadaag kuwaaga, sidoo kale. Waqti ku qaado oo dulmar himilo kasta markeeda. Intaas kadib, kala hadal arinta waqtiyo kamid ah maalinta, sida xiliyada cuntada, markaad aaddaan dukaanka adeegga, ama markuu seexan rabo ilmuhu. Qor waxa adiga iyo cunugaagu aad go'aansataan inay yihiin dabeecado wanaagsan kuna qora bokis kasta xiliyo kala duwan maalinta. Waxaa ugu fiican inaad kusoo koobto 1-3 dabeecadood bokis kasta. Tusaalaha ku qoran bogga 3 ayaa ku siinaaya dhawr fikradood oo ku aaddan sida aad u adeegsanayso shaxda. Shax aan waxba lagu qorin ayaa ku taala bogga labaad si aad ugu adeegsato qoyskaaga. Waxaad shaxda qoyskaaga la wadaagi kartaa macalinka cunugaaga si uu u ogaado sida aad u taageerayso dabeecadaha wanaagsan intuu guriga joogo!














Dukumiintigaan waxaa abuuray Ohio Statewide Family Engagement Center (Xarunta Wada Shaqaynta Qoysaska ee Gobalka Ohio oo dhan) oo kaashanaysa Ohio Family and Community Engagement Network (Ururka Wada shaqaynta Qoyska iyo Bulshada Ohio) iyo Ohio Department of Education's PBIS Network (Ururka PBIS ee Waaxda Waxbarashada Ohio). Booqo OhioFamiliesEngage.osu.edu si aad u hesho farsamooyin dheeraad ah ood ku fuliso guusha ardayga adoo adeegsanaaya iskaashiyada wada shaqayneed ee qoyska-dugsiya-bulshada!

Ee Qoyska

Shaxda Dabeecadaha Wanaagsan

Hoos ku qor himilooyinkaaga	Waqtiga (Adeegso waqtiyada iyo meelaha ku qoran hoos ama abuuro kuwo iskaa ah.)			
	Subixii	Xiliyada cuntada	Xiliga hurdada	U bixida Banaanka

Tusaalaha Shaxda Dabeecada Wanaagsan ee Qoyska

Hoos ku qor himilooyinkaaga	Waqtiga			
(Waxaad dooran kartaa himilooyinka dugsigaaga si aad u bilowdo)	Subixii	Xiliyada cuntada	Xiliga hurdada	U bixida Banaanka
<p>Ahow Qof Qadarin Badan</p>	<p>Dheh "Subax Wanaagsan"</p> 	<p>Fariisto miiska aad wax cuntide</p> 	<p>Seexo xiliga saxda ah</p> 	<p>Sugo markaaga</p> 
<p>Noqo Qof Masuul ah</p>	<p>Farxalo cuntada ka hor</p> 	<p>Nadiifi aagaaga markaad cuntada dhamaysato</p> 	<p>Cadayo</p> 	<p>La joog qof wayn</p> 
<p>Is Ilaali</p>	<p>Dhinac soco waddada si aad u hesho baska dugsiga</p> 	<p>Taxadar lahow markaad istiemaalayso alaabaha afaysan</p> 	<p>Ka qaad boonbalayaasha dhulka</p> 	<p>Geesaha iska fiiri kahor intaadan goyn waddada</p> 